



Waxa diyaariyay ururka Laanqayrta Cas ee Ingiriiska, waxana lagu sargooyay xaaladda kilinigga dawaynta ajinebiga ee cusbataaka jaamacadda Odense.

SOMALISK

SOOMAALI

1	Haa. Maya. Ma Aqaanno. Maan fahmin.
2	Waa maxay magacaagu? Ma ku qori kartaa af deenish?
3	Goorma ayaad dhalatay? – bi, sannad?
4	Halkaad ka timi?
5	Goorma ayaad Danmark timi?
6	Fadlan qor ¹ cinwaankaaga. ² tilifoonkaaga. ³ mobiilkaaga.
7	Ma na siin kartaa magaca iyo tilifoonka ama cinwaanka qof lala soo xidhiidho?
8	Dhawaan ayuu ku baadhi doonaa ¹ dhaktar. ² kalkaaliso.
9	Ma shil baa kugu dhacay? Goorma? (ku muuji taariikhda iyo saacadda).
10	Miyaad miyir beeshay?
11	Goorma ayaad xanuunsatay? (ku muuji taariikhda iyo saacadda).
12	Miyuu xanuun ku hayaa? Tilmaan meesha. Goormaa xanuunka kuugu horraysay? (ku muuji taariikhda iyo saacadda).
13	Intee ayuu le'egyahay xanuunka ku hayaa? (xanuun ma jiro) 1 2 3 4 5 6 7 8 9 10(xanuun daran).
14	Xanuunku, Ma isdaba-joog baa? Mise marmar ayuu ku qabtaa?
15	Miyuu dhiig kaa yimi? Tilmaan meesha.
16	Miyaad qufacdaa? Miyay qufaca wax soo raacaan? Wax midabkee ah? caddaan? hurdi-cagaar? casaan? bunnii?
17	Miyay neeftu ku qabataa?
18	Miyaad matagtay? Miyaad dhiig matagtay?
19	Ma leedahay xummad?
20	Miyuu shuban ku hayaa?
21	Miyay calooshu ku taagantahay?
22	Miyaad dhigtay saxaro madaw?
23	Boqnuhu miyay ku bararaan?
24	Miyaaad caatowday ama dhuubatay?
25	Miyay dhibaato kaa haysataa ¹ aragtida? ² maqalka? ³ wax liqida?

	⁴ socodka?
26	Miyaa marna lagu qalay? Tilmaan meesha.
27	Goorma ayey caadadii u dambaysay ee kaa timi bilaabantay? (ku muuji taariikhda). Miyaad uur leedahay? Uurkaagu waa imisa bilood? Miyaa laga yaabaa inaad uur leedahay? Ma kuu samayn karnaa tijaabada uurka?
28	Ma kaa baadhnaa fayrasta HIV?
29	Miyaad sigaarka cabtaa? Imisa midh ayaad maalintii cabtaa?
30	Miyaad leedahay ¹ macaan? ² suuxdin? ³ xiiq? ⁴ cudur aan aga bogsan?
31	Miyaad marna yeelatay ¹ wadne xanuun? ² wadne gariiri? ³ dhiig kar? ⁴ guntimaha dhiigga ama wadnaha oo ku joogsaday? ⁵ Dhiig maskaxda ma kaaga furmay? ⁶ cagaarshow (joonis)? ⁷ beer xanuun?
32	Miyaad wax dawo ah elleerjik ku tahay? Baynasallin? Asbiriin? Ama dawo kale?
33	Miyaad wax dawa ah imika qadataa? Miyaad qaar ka mid ah sidataa? Miyaad qaadataa dawooyin kale oo sinaaci ah ama dabiici ah?
34	Immisa midh oo kiniin ah ayaad qaadatay?
35	Miyaad qaadatay kiniinno iyo dawooyin kale? Miyaad wax badan ka qaadatay?
36	Ma kuu dhammystiranyihiin tallaalladii tetanus?
37	Goorma ayaa ugu danbaysay ee lagaa tallaalay tetanus?
38	Miyaad dhawaan tagtay waddan aan ahayn Danmark? Waddankeey ayaad tagtay? Goorma?
39	Waxaan ahay: ¹ kalkaaliso. ² dhakhtar. ³ shaqaalaha gargaarka degdegga ah. ⁴ dhakhtarka anbalaaska. ⁵ adeege bulsheed. ⁶ kaaliye caafimaad iyo bulsheed.
40	Ma ku baadhi karaa? Miyaad wax ka qabtaa hadduu ku baadho ¹ nin? ² haweenay?
41	Raalli ahow waxa laga yaabaa inay xanuun leedahay.
42	Waxaan u baahanahay inaan cabirno dhiigaaga.
43	Waxaan u baahanahay inaan laabtaada dhegaysto.

44	Waxaan u baahanahay inaan wadnahaaga baadho.
45	Waxaan u baahanahay inaan calooshaada eego.
46	Waxaan u baahanahay inaan sameeyo baadhitaan gudeed.
47	Waa inaan ku mudo.
48	Waxaan u baahanahay inaan tiyuubkan kugu eego.
49	Waxaan u baahanahay inaan dhiig kaa qaado.
50	Waxaan u baahanahay inaan sawir kaa qaado ama khashaafad ku saaro.
51	Waxaan u baahanahay inaan suuxiyo goobta la tolayo.
52	Waxaan u baahanahay inaan ku tolo. Si uu tolmaha kaaga furo waa inaad dhakhtarkaaga u tagtaa maalintan (ku muuji taariikhda iyo saacadda).
53	Waxa ku jaban/dillaacsan: ¹ lug. ² boqon. ³ gacan. ⁴ dhudhun. ⁵ garab.
54	Waxaad u baahantahay in nuurad agu kabo: ¹ lugtaada. ² boqontaada. ³ gacantaada. ⁴ dhudhunkaaga.
55	Waa inuu kugu xidhnaadaa (tilmaan) illaa taariikhda ah (ku muuji taariikhda).
56	Dhakhtarkaaga u tag si uu kaaga furo nuuradda maalintaas (ku muuji taariikhda).
57	Fadlan ku kaadi weelkan.
58	Wax ha cunin waxna ha cabin.
59	Waad kici kartaa iminka.
60	Waxaad u baahantahay in cisbitaalka lagu dhigo. Fadlan sug inta waadhka sariir lagaaga helayo.
61	Wax waliba way hagaagi doonaan. Ha warwarin.
62	Tagsi ma kuugu yeedhaa?
63	Kan isticmaal haddii aad caawimo u baahato.
64	Fadlan sug. Fadlan halkan soo mar. Waad iska hoyan kartaa hadda.
65	Fadlan soo noqo haddii dhibaatooyin kale kugu soo kordhaan.
66	La xidhiidh dhakhtarkaaga ama dhakhtarka heeganka, haddii dhibaatooyin kugu soo kordhaan.
67	La xidhiidh dhakhtarkaaga, haddaad isku aragto ¹ jidhka oo casaada. ² barar. ³ caabaq. ⁴ xummad.

68	Aan intaa mar labaad kuugu celiyo.
Su'aalaha ay dadka bukaa waydiiyaan	
69	Muddo intee ah ayaan sugi doonaa? Illaa 1 saacad. illaa 2 saacadood. illaa 3 saacadood. illaa 4 saacadood.
70	Ma cidbaa magacayga iigu yeedhi doonta?
71	Halkuu telefoonku ku yaal, waxaan u baahanahay inaan la hadlo qoyskaygii/saaxiibkay?
72	Fadlan ma iigu yeedhi kartaa tagsi aan gurigaygii ku tago?
73	Saw ma bogsan doono?